

## Maxay TIM arintan ka qabaneysaa?

Dembiyada dagaalku waa nooca ugu adag dembiyada. Waxaanu aaminsannahay dembiilayaasha dembiyada dagaalka in loo ciqaabo habka ugu adag ee sharciga, meelkasta oo ay joogaan. Netherlands ma dooneysa in ay noqoto meel ay ku badbaadaan dembiilayaasha dagaalka. Dowladda xattaa waxay dooneysaa in ay ka hortagto dadka kasoo fakaday xaaladaha dagaalka ee soo galay Netherlands in ay iska horyimaadaan dembiilayaashii ay kasoo fakadeen.

## Ma heysaa macluumaad ku saabsan dembiyada dagaalka? Inoo soo sheeg:

Hay'adda Booliiska Netherlands  
**Xarunta Dembiyada Qaranka**  
*Cinwaanka booqashada*  
Hoofdstraat 54, 3972 LB Driebergen, The Netherlands  
*Cinwaanka boostada*  
P.O. Box 11, 3970 AA Driebergen, The Netherlands  
*Telephone:* +31 6 11 91 77 16 / +31 343 53 53 54  
*Fax:* +31 343 53 64 82  
*E-mail'ka:* [warcimesunit@klpd.politie.nl](mailto:warcimesunit@klpd.politie.nl)  
*Barta internetka:* [www.warcimes.nl](http://www.warcimes.nl)

# Dembiyada dagaalka: inoo soo sheeg!

Qaybta Dembiyada Caalamiga

Hay'adda Booliiska Netherlands - Xarunta Dembiyada Qaranka



Daabacaaddan KLPD waa mid loogu talo galay macluumaad ahaan oo kali ah. Xuquuqda waxa qoraalku ka kooban yahay waxba lagama bedeli karo.  
Agoosto 2009  
Design'ka • Het Lab - grafisch ontwerpers BNO, Arnhem  
Sawir qaadidda • Midden Nederland unit, ANP



« waakzaam en dienstbaar »

## Dembiyada dagaalka: inoo soo sheeg!

Haddii aad tahay qaxooti ka yimid waddan dagaal ka jiro, khibradaha aad u leedahay waddankii aad ka timid ayaa muhiim inoo noqon kara. Waxaad ogaan kartaa dembiilayaasha dagaal ee hadda joogo Netherlands.



## Ma garanaysaa qof soo sameeyay dembiyo dagaal?

Haddii aad garaneyso qof soo sameeyay dembi dagaal, laakiin aadan aqoonin wixii aad ka yeeli laheyd macluumaadkaas, la soco in Qaybta Dembiyada Caalamiga (Team Internationale Misdrijven, TIM) ay sameeyso baaritaano iyagoo metelayo Adeegga Dacwadaha Shacabka ee dembiyada dagaalka, gumaadka, jirdirka iyo dembiyada lidka ku ah bini'aadamnimada. Haddii dambiile dagaal uu joogo gudaha Netherlands, waxaa suurtagal ah in baaritaan lagu furo. Waxaa kale oo aan macluumaadka u isticmaali karnaa haddii isaga/iyada uu u fakaday wadan kale. Sanadihii lasoo dhaafay, waxaanu baaritaano noocan ah ka sameynay Rwanda, Afghanistan, Yugoslavia'yadii hore, Sierra Leone, Liberia iyo Congo. Maxkamadaha Dutch'ka ayaa hore ugu xumumay dembiilayaal dagaal xabsi.



## Waa maxay sababta ay TIM u dooneyso in aad aqriso arintan?

Macluumaadkaagu wuxuu inaga caawin karaa soo qabashada dembiilayaasha dagaalka. Tusaale ahaan, waxaa dhici karta in aad heyso macluumaad ku saabsan qof heysta dhalashada Dutch'ka oo ka soo qaybqaatay dagaalo ama in adiga laftirkaagu aad tahay dhibanaha dembiyada dagaalka.

Si kasta oo uu arinku yahayba, waxaanu kaa codsaneynaa in aad nala soo xiriirto iyadoo aysan waajib kugu aheyn. Ka dibna waxaanu eegi doonnaa wixii aan ku qaban karno macluumaadkaaga, kaas oo dhab ahaantii ay kooxdeena dembi baarayaasha ah ula dhaqmi doonaan qarsoodi ahaan.

## Waa maxay dembiilayaasha dagaalku?

Dembiilayaasha dagaalku waa dad sameeyay tallaabooyin mabnuuc ka ah sharciyada dagaalka xilliga uu dagaal socdo. Tan waxaa ka mid noqon kara dilka maxaabiista iyo /ama shacabka, dagaal gelinta carruur askar ah, kufsi, handadaad, jirdil iyo isticmaalka hub aan la ogoleyn sida gaaska sunta ah. Dembiile dagaal waxaa laga yaabaa in uu sameeyay tallaabooyinkan isaga/iyada ama uu bixiyay amar sidaas lagu yeelayo. Dhanka kale, isaga/iyada waxaa laga yaabaa in uu mas'uul ka ahaa dembiyada iyadoo ay sabab u tahay isaga/iyada jagada uu hayo uuna wax ka qaban karay.